Tallaalka & Xoojiyaasha COVID-19 ee Guriga Ku Salaysan Caawimaada Hore u Helitaanka & Sinaanta Caafimaadka

Qiyaastii ku dhawaad 30 boqolkiiba dadka degan gobolka Washington looma tixgeliyo kuwa si buuxda uga tallaalan COVID-19. Xogta waxay muujinaysaa in tallaalka u ka difaaco fayraska. Tallaalka waxa uu yareeyaa fursada cudurka daran iyo dhimashada haddii uu kuugu dhaco fayraska oo waxa uu ka caawinayaa yareeynta isbitaal dhigista la xiriirta fayraska. Waa muhiim in la helo taxanaha tallaalka billowga ah iyo kuurada xoojinta ah si ay kaaga caawiyaan joogteynta jawaab-celinta difaaca jirkaaga ka dhanka ah noocyada cusub ee COVID-19. Talada bixinta hadda ee loogu talagalay xoojiyeyaasha ayaa lagu muujiyay jaantuska hoose:

Tallaalka ayaa loo dhammaystiray taxanaha koowaad	Da'da loo oggolaaday ee qaadanaaya xoojiyayaasha tallaalka	Muddada u dhaxaysa garoojada aasaasiga ah ee u dambaysay (ay ku jirto garoojo dheeraad ah, marka ay habboon tahay) iyo kuurada xoojinta	Tirada kuurooyinka
Pfizer-BioNTech	≥ 12 sano jir	≥ 5 bilood jir	1
Moderna	≥ 18 sano jir	≥ 5 bilood jir	1
Janssen	≥ 18 sano jir	≥ 2 bilood jir	1

Waxaa uu kaa caawinayaa inaad ilaaliso naftaada iyo kuwa haray ee aan awoodin inay qataan tallaalka. Dad badan oo guri-joog ah ayaa ku tiirsan kuwa kale si ay uga caawiyaan siinta baahidooda maalinlaha ah, iyadoo qaar kalena ay si joogto ah u soo galaan guryahooda. Waxay weli u nugul yihiin qaadida fayraska ee ka dhanka ah dadka kale kuwaas oo laga yaabo in aan la tallaalin ama iyaga oo aan ogayn la kulma gudbinta bulshada.

Haddii adiga ama qof aad taqaan uu yahay guri-joog oo u baahan yahay tallaalka COVID-19 ama xoojiyaha talaalka, ka codso maanta mid ka mid ah xulashooyinka hoose:

• Wac maamulka caafimaadka ee deegaankaaga si aad u hesho adeegyada talaallka ee guriga.

• Wac Khadka Caawimaada COVID-19 ee Gobolka si aad ula socodsiiso inaad u baahan tahay adeegyada tallaalka guri-joogta. Wac 1-800-525-0127 ama 1-888-856-5816, ka dibna riix #. **Turjumaanada luuqadeed ayaa la heli karaa!**

• Buuxi foomka diiwaangelinta oonleenka ah ee hoos ku qoran si laguugu xiro kooxaha tallaalka wareega ee degmada iyo/ama gobolka kuwaas oo ku siin kara ama diyaarin kara adeegyada tallaalka guri-joogta.

Lifaaqa Xog-uruurinta Codsiga Tallaalka Guri-joogta ee Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka): https://redcap.link/WA_HomeBasedVax (Ingiriis)

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan adeegaan, fadlan iimayl u dir: covid.vaccine@doh.wa.gov.

Taarikhda hore ee Barnaamijka

Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka) waxay billoowday bixinta tallaalada guri-joogtada bishii Maarso 2021 DOH-da Guri-joogta ah Xog-uruurinta Codsiga Tallaalka (Ingiriis) waxaa uu daboolayaa dhammaan 39-ka degmo ee gobolka Washington. Tallaalayaasha aagga ayaa sii wada bixinta wacyigelinta iyo adeegyada si ay u gaarsiiyaan tallaallada aasaasiga ah iyo kuurooyinka xoojinta kuwa u baahan. Adeegyada tallaalka guri-joogta waxaa lagu codsan karaa luuqado dheeraad ah iyada oo la wacayo Khadka Caawimaada COVID-19 (Wac 1-800-525-0127 ama 1-888-856-5816), kadibna taabo # si aad u hesho caawimaada luqadda.

Hormarinta Sinnaanta Tallaalka

Adeegyada Tallaalka Guri-joogta waxa ay siyaan tallaallada COVID-19 aaggaga ka tirsan gobolka halkaas oo laga yaabo in lacala aan tallaallada la heli karin. Ujeedada adeegyada waa in la hormariyo sinnaanta caafimaadka iyo helitaanka tallaalka COVID-19 kuwa laga yaabo:

- In aysan awoodin inay ka baxaan guriga, safka istaagaan, ama u lugeeyaan masaafo kasta.
- Inay ka cabanaayo naafanimo jireed ama garaad ahaaned.
- Inay ka cabanaayaan helitaanka xaddidan ee xaaladaha caafimaadka dhimirka.

Tallaalada guri-joogta waxay gacan ka geystaan hormarinta sinnaanta caafimaadka meelaha ka tirsan gobolka oo loo yaqaano talaalka meelaha lama-degaanada ah. Tallaalka meelaha lama-degaanka waxa uu jiraa marka mid ka mid ah kuwan soo socda run yahay:

- Ma jiraan goobo tallaal.
- Ma jiraan dhakhaatiir tallaalka bixiya.
- Waxaa jira bixiyeyaal yar oo diyaar u ah inay u adeegaan aagga juqraafiga ah iyo dadka ku nool

Adeegyada tallaalka ee loogu talagalay dadwaynaha ayaa laga yaabaa inaan la heli karin ama ay adagtahay in laga helo goobahan dhexdooda. Adeegyada tallaalka guri-joogta waxaa uu meesha ka saarayaa arrimaha helitaanka ee inta badan lala kulma marka ay ku nool yihiin meel aad u adag in la gaaro juqraafi ahaan iyo meelaha fog ee ka tirsan gobolka.

Adeegyada tallaalka mobilada waxay gacan ka geystaan inay dadka si toos ah guryahooda ugu helaan tallaalka naf-badbaadiya ah. Adeegani waxaa uu si toos ah diirada u saarayaa meelaha la og yahay inay leeyihiin tusmaada u nuglaanshaha bulsheed ee aadka u sarreeya, taas oo muujinaysa sinnaan la'aanta caafimaadka ee suurtagalka ah. Dadka waxay ku codsan karaan tallaalka iyaga oo u soo maraayo xog-uruurinta iyada oo aan loo eegin meesha ay kaga nool yihiin gobolka Washington.

Miyaa adeegyada kale ee guriga dhexdiisa laga heli karaa wixii ka baxsan tallaalka COVID-19?

Hadda, kooxaha kalkaalisada wareegaan waxay bixin karaan oo kaliya tallaalka loogu talagalay tallaallada COVID-19. Tallaalka hargabka iyo adeegyada kale ee suurtagalka ah sida baarista dhiigga shaybaarka lama heli karo waqtigan.

Adeegga kooxda wareega ayaa diyaar u ah inuu gacan ka geysto hormarinta sinnaanta caafimaadka ee loogu talagalay dadka la og yahay inay halis weyn ugu jiraan dhimashada iyo isbitaal dhigista ka dhanka ah COVID-19. Fadlan ka fiirso inaad u buuxiso xog-uruurinta qof maanta u baahan helitaanka tallaalka COVID-19.

Maxaan filan karaa ka dib Marka aan Gudbiyo Codsi?

DOH waxay soo aruurisaa foomamka codsiga toddobaad kasta waxayna u dirtaa sharciga deegaanka ee caafimaadka dadka deegaanka ah si ay u wacyigeliyaan iyo tallaabana ugu qadaan. Shaqaalaha xafiiska caafimaadka deegaanka ayaa la xiriiri doona kooxda tallaalka wareega. Haddii shaqaalaha caafimaadka deegaanka aysan awoodin inay isku duwaan tallaalada guri-joogta, waxay la shaqayn doonaan DOH si ay u taageeraan.

Khadka caawimaada luqadda ee fogaan araga ah ayaa diyaar u ah si uu kaaga taageero baahi kasta oo tarjumaad ah. Haddii xafiiska caafimaadka dadweynaha ee deegaanka uusan awoodin inuu ku caawiyo, Xafiisku waxa uu caawimaad ka codsan karaa DOH. Kooxda tallaalka wareega ayaa la xiriiri doona codsadaha si ay ugu qorsheeyaan adeega tallaalka COVID-19 ee guriga ku saleysan ee bilaashka ah.

DOH 821-169 March 2022 Somali

Washington State Department of Health

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimeel udir civil.rights@doh.wa.gov